# Su'aalaha Inta badan La isweydiiyo: Foomka Verbal ROI ee Caadiga ah ee MultCo ee loogu talagalay Wadaagista Xogta HMIS

Si aad u hesho faahfaahin buuxda oo ku saabsan xuquuqda dhanka xogta ee ka qayb qaatayaasha iyo sida macluumaadka HMIS loo isticmaalo, booqo: *https://hsd.multco.us/hmis-links-for-providers/hmis-privacy-security-notice/*

## Tusmada Qoraalka


Goorma ayay tahay in aan bilaabo isticmaalka Verbal ROI?

Miyaa la iiga baahan yahay in aan foomkan ROI ka helo ka qayb qaate?

Goorma ayaan Verbal ROI u akhriyaa ka qayb qaatayaasha?

Miyaa saxiix looga baahan yahay ka qayb qaataha ka tirsan ROI?

Miyuu hal qof oo weyn oggolaan karaa in uu la wadaago xogta qof kale oo weyn oo jooga gurigiisa?

Waa maxay xogta lagu wadaago HMIS iyada oo aan la eegayn oggolaanshaha?

Maxay yihiin macluumaadka kale ee ay dhici karto in la wadaago iyada oo aan la bixin 'release'?

Yaa arki kara xogta ka qayb qaataha marka lagu wadaago HMIS?

Muddo intee le'eg ayay wadaagista xogta ku sii jirtaa HMIS?

Maxaan sameeyaa haddii ka qayb qaatuhu oggolaado shuruudaha ROI hal ama in ka badan oo maalmood ka dib marka uu galo barnaamijka?

Immisa ROI-yada ah ayaan geliyaa HMIS?

Haddii qof “maya” yiraahdo ROI, miyaan weli u baahanahay in aan iyada geliyo HMIS?

Foomka Verbal ROI laftiisu ma u baahan yahay in la hayo?

Foomka Verbal ROI ma u baahan yahay in lagu soo dejiyo HMIS?

Halkee baan ka heli karaa sharraxaada buuxda ee xuquuqda ka qayb qaataha ee ku saabsan macluumaadkiisa?

Caawimaada HMIS, Tababarka iyo Ilaha

Revision History

## Goorma ayay tahay in aan bilaabo isticmaalka Verbal ROI?

Dhammaan hay’aduhu waa in ay bilaabaan isticmaalka ROI dhanka afka ah laga bilaabo Luulyo ‘25.  Iyada oo taasi la sheegay, hay’ado kala duwan ayay dhici kartaa in ay ku jiraan jadwalo kala duwan marka la eego qaadashada ROI-ga dhanka afka ah. La xiriir horjoogahaaga oo email u dir hmishelp@multco.us wixii su’aalo ah.

## Miyaa la iiga baahan yahay in aan foomkan ROI ka helo ka qayb qaate?

Haa.  Marka la sameynayo isku diiwaan gelinta barnaamij cusub oo ka tirsan HMIS, dhammaan adeeg bixiyayaasha waxaa looga baahan yahay in ay diiwaanka geliyaan haddii macmiil oggol yahay in uu wadaago macluumaadka la isku aqoonsanayo ee ku jira HMIS iyada oo la adeegsanayo ROI oo ay bixiso HSD.    Ma aha in kaliya ROI-kani bixiyo dokumentiyo ku saabsan oggolaanshaha macmiilka, wadaagista macluumaadka ku jira HMIS wuxuu adeeg bixiyayaasha u saamaxaa in ay si fudud ugu adeegaan macaamiisha, si sawir fiican looga helo adeegyada ay macaamiishu ka helayaan dhammaan noocyada kala duwan, iyo ka caawinta diiwaan gelinta hoy la’aanta soo jireenka ah.

## Goorma ayaan Verbal ROI  u akhriyaa ka qayb qaatayaasha?

Qoraalka u akhri ka qayb qaatayaasha marka la joogo barnaamijka qiimeynta.   Ku qor jawaabtooda “haa” ama “maya” foomka Verbal ROI. Tani samee ka hor inta aadan bilaabin diiwaan gelinta mid kasta oo ka mid ah macluumaadkooda ku jira HMIS. Shaqaalaha hay’adu waa in ay isticmaalaan go’aankooda ku saabsan goorta saxda ah ee la akhrinayo Verbal ROI inta lagu jiro qiimeynta,

## Miyaa saxiix looga baahan yahay ka qayb qaataha ka tirsan ROI?

Maya, saxiix la iskagama baahna.  Waxa kaliya ee looga baahan yahay ka qayb qaatuhu waa in uu tilmaamo haddii uu oggol yahay in uu xogtiisa ku wadaago  HMIS ama in kale.  Haddii uu ka qayb qaatuhu uu leeyajay carruur (da’doodu ka hooseyso 18 jir), waa in uu sidoo kale tilmaamaa haddii uu oggolaanayo in xogta carruurtiisa lagu wadaago HMIS ama in kale. Shaqaaluhu waxay u baahan yihiin in ay jawaabta ku qoraan foomka.

## Miyuu hal qof oo weyn oggolaan karaa in uu la wadaago xogta qof kale oo weyn oo jooga gurigiisa?

Maya, qof weyn oo kasta (oo da’diisu tahay 18 jir ama ka weyn tahay) oo ka tirsan gurigu waa in uu bixiyaa oggolaansho u gaar ah.  Verbal ROI gooni ah waa loo buuxiyaa qof kasta oo weyn oo ka tirsan guriga.

## Waa maxay xogta lagu wadaago HMIS iyada oo aan la eegayn oggolaanshaha?

Qoddobada xogta ee soo socda ayaa lagu wadaagaa HMIS iyada oo aan la eegayn haddii ka qayb qaatuhu oggolaado in uu wadaago xogtiisa iyo in kale.

- Magaca Hore & Dambe
- Magaca la isku yaqaano
- Tayada Xogta SSN
- Xaalada Qofka soo halgama
- Magaca Tayada Xogta
- Lambarka Social Security-ga (oo looga baahan yahay adeegyo gaar ah)
- Da’da

## Maxay yihiin macluumaadka kale ee ay dhici karto in la wadaago iyada oo aan la bixin ‘release’?

Xogta HMIS ayay dhici kartaa in iyada oo ka baxsan HMIS lala wadaago dad gaar ah oo ka tirsan ururo la oggol yahay iyada oo la eegayo duruufaha qaarkood.  Xaaladu waa sidan oo kaliya haddii Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka ee HMIS ay oggolaato iyada.  Duruufaha ay dhici karto in lagu wadaago macluumaadka iyada oo aan la bixin ‘release’ waxaa lagu sharraxay Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka.  Meesha laga sii gelayo ‘link’ Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka waxay ku hoos jirtaa su’aasha, “Halkee baan ka heli karaa sharraxaada buuxda ee xuquuqda ka qayb qaataha ee ku saabsan macluumaadkiisa?”  ee hoosta ku qoran.

Halkan waxaa ku qoran tusaalooyin dhowr ah oo ku saabsan marka macluumaadka qof uu leeyahay la wadaagi karo iyada oo aan la bixin ‘release’:

- Haddii ay hay’ad barnaamij u wareejinaysayso hay’ad cusub oo hay’ada cusubna u baahan tahay macluumaadka la iskala soo xiriirayo oo loogu talagalay ka qayb qaatayaal hadda jira
- Si loo xaqiijiyo in ka qayb qaate uu xaq u leeyahay barnaamij gaar ah
- Haddii ka qayb qaate uu qabo xaalad caafimaad oo degdega ah (tusaale, wadne xanuun ama dhaawac weyn), uu miyir la’aa ama jawaab bixiyayaasha xaalada degdega ah ay codsadeen magaca ka qayb qaataha iyo taariikhdiisa dhalasho si ay uga caawiso in ay raadiyaan diiwaankiisa caafimaadka.
- Haddii qareenka ka qayb qaatuhu codsaday macluumaadkiisa
- Haddii hanti-dhawraha Degaanku u baahdo gelitaanka macluumaadka HMIS si uu u guto hanti-dhawr ama khadka tooska ah ee cabashada dowlad wanaaga
- Marka la eego amar maxkamaddeed ama amarka imaanshaha maxkamada oo ansax ah

Fiiri Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka si aad u hesho sharraxaada buuxda ee xuquuqda ka qayb qaataha.

## Yaa arki kara xogta ka qayb qaataha marka lagu wadaago HMIS?

Fiiri Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka ee HMIS si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cidda heli karta xogta HMIS. Meesha laga sii gelayo 'link' Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka waxay ku hoos jirtaa su'aasha, "Halkee baan ka heli karaa sharraxaada buuxda ee xuquuqda ka qayb qaataha ee ku saabsan macluumaadkiisa?" ee hoosta ku qoran.

## Muddo intee le'eg ayay wadaagista xogta ku sii jirtaa HMIS?

Marka laga reebo macluumaadka la isku aqoonsanayo ee aasaasiga ah, wadaagista xogtu waxay socotaa muddo 7 sano ah laga soo bilaabo taariikhda bilawga ROI. Si loo hubiyo in ay tani u dhacdo si sax ah, fadlan xaqiiji in aad sameyso kuwa soo socda:

1. Ka dhig Taariikhda Bilawga ROI mid la mid ah taariikhda bilawga barnaamijka.
2. Calaamadee Taariikhda Dhammaadka ROI oo la mid ah Taariikhda Bilawga ROI *oo lagu daray toddobo sano.*

## Maxaan sameeyaa haddii ka qayb qaatuhu oggolaado shuruudaha ROI hal ama in ka badan oo maalmood ka dib marka uu galo barnaamijka?

Ka dhig Taariikhda Bilawga ROI mid la mid ah taariikhda bilawga barnaamijka xataa haddii uu ku raacsan yahay ROI maalin kale. Sida nidaamka loo dhisay awgeed, tani waxay muhiim u tahay in xogta laga dhigo mid si sax ah u socota. Waxaan u qaadanaynaa in ka qayb qaatuhu fahamsan yahay in uu oggolaanayo wadaagista xogta *ee loogu talagalay barnaamijka uu ka diiwaangashan yahay.*

## Immisa ROI-yada ah ayaan geliyaa HMIS?

Laba ah ROI-yada geli HMIS: mid loogu talagalay bixiyaha gelitaankaaga iyo mid loogu talagalay barnaamijka ka qayb qaatuhu gelinayo. Haddii aad awoodi waydo in aad aragto adeeg bixiyayaasha lagama maarmaanka ah si ay tani u dhacdo, fadlan la xiriir [hmishelp@multco.us](mailto:hmishelp@multco.us) si aad u hesho taageero.

## Haddii qof “maya” yiraahdo ROI, miyaan weli u baahanahay in aan iyada geliyo HMIS?

Haa, shaqaaluhu waa in ay geliyaan ROI-yada loogu talagalay ka qayb qaatayaasha aanan oggolaan in ay wadaagaan xogta.  Dadka aan oggolayn in ay wadaagaan xogtooda, meesha ay ku qoran tahay “Oggolaanshaha La bixiyay” waa in ay la mid noqotaa “maya” ROI dhexdeeda ee ku jirta HMIS. Marka “Oggolaanshaha La bixiyay” la mid tahay “maya”, xogta lama wadaagi doono. ROI-yadani waa in weli la geliyaa si ay u muujiyaan in ka qayb qaataha loo soo bandhigay kala doorasho.

## Foomka Verbal ROI laftiisu ma u baahan yahay in la hayo?

Haa, nuqulka foomka la buuxiyay waa in lagu hayaa faylka ka qayb qaataha muddo 7 sano ah.

## Foomka Verbal ROI ma u baahan yahay in lagu soo dejiyo HMIS?

Maya, nuqul dhijital ah ee foomku uma baahna in lagu soo dejiyo HMIS.  Si kastaba ha ahaatee foomka dhabta ‘physical form’ waxaa loo baahan yahay in la hayo muddo 7 sano ah.

## Halkee baan ka heli karaa sharraxaada buuxda ee xuquuqda ka qayb qaataha ee ku saabsan macluumaadkiisa?

Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka ayaa bixisa sharraxaada buuxda ee xuquuqda ka qayb qaataha ee ku saabsan xogtiisa.   Si aad u aragto Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka, booqo:
http://hsd.multco.us/hmis-links-for-providers/hmis-privacy-security-notice/
Ogeysiinta Asturnaanta & Ammaanka waa in laga dhigaa mid uu heli karo ka qayb qaatuhu marka uu codsado.

Fadlan ogow: Sawirka weyn ee Asturnaanta waa in loo soo dhejiyaa si u muuqata dhammaan goobaha qiimeynta *ama* laga dhigaa mid uu heli karo ka qayb qaataha jooga qiimeynta kaasi oo ah hab kale oo muuqda.  Si aad u aragto Sawirka weyn ee Asturnaanta, booqo: https://hsd.multco.us/hmis-links-for-providers/privacy-poster/

## Caawimaada HMIS, Tababarka iyo Ilaha

### La xiriir si aad u hesho caawimaad ama tababar

Fadlan la xiriir hmishelp@multco.us. Waxaan ka jawaabi karnaa su'aalo kasta oo aan kaa caawin karnaa in la go'aamiyo caawimaada ama tababarka loo baahan karo.

### Ilaha dheeraadka ah ee HMIS

Waxaan leenahay ilo iyo dokumentiyo kala duwan oo laga heli karo website-yaga oo ku jira qaybta Laga sii galayo HMIS ee loogu talagalay Adeeg bixiyayaasha: https://hsd.multco.us/hmis-links-for-providers/

### Sida ROI loo geliyo HMIS

Muuqaalka wax laga baranayo oo ku saabsan sida ROI loo geliyo HMIS: https://www.youtube.com/watch?v=A6YYacA-sd4

### Nagala soo qayb gal Kulankeena Isticmaalaha HMIS ee Bilaha ah

Waaxda Adeegyada Guri la'aanta (oo hore loogu yaqaanay Xafiiska Wadajirka ee Adeegyada Guri la'aanta (JOHS)) ayaa martigelinaysa kulanka bilaha ah oo loogu talagalay isticmaalayaasha HMIS. Kulankan waxaan:

- Ku wadaagaynaa macluumaad cusub oo ku saabsan HMIS
- Kaga hadlaynaa wax ku saabsan su'aalaha iyo arrimaha ku saabsan isticmaalaha
- Ku yeelanaynaa wada hadalo iyo bixinta jawaab celin

Haddii aad tahay isticmaalaha HMIS ee hay'adaada oo aad rabto in lagu martiqaado, fadlan la xiriir: hmishelp@multco.us.

## Revision History

Oktoobar '25: Laga saaray "Gender" liiska qoddobada xogta si loo wadaago iyada oo aan la eegayn oggolaanshaha. Jinsigu kama mid aha waxyaabaha lagu wadaago HMIS iyada oo aan la eegayn oggolaanshaha. Lagu daray su'aalaha & jawaabaha soo socda:

- "Maxay yihiin macluumaadka kale ee ay dhici karto in la wadaago iyada oo aan la bixin 'release'?

- “Foomka Verbal ROI ma u baahan yahay in lagu soo dejiyo HMIS”